

## **LA WADAAG WARQADAN DIYAARIYAH A CASHUURTAADA SI AAD U HESHO LACAG GUDIDA SAXDA AH**



# TILMAAMO MUHIIM AH OO CASHUUR DIYAARIYAH A AH

**Ku:** Diyaariyaha Cashuurta Qoyska

**Ka:** Minnesota Afterschool Advance

**Jawaab:** Dalabka Daynta Cashuurta Waxbarashada K-12 ee MN

Qoyska aad u diyaarinayso cashuur celinta 2021 waxa ay ku jiraan Minnesota Afterschool Advance (MAA).

**Waxaa muhiim ah inaad eegto in qoysku u qalmo Daynta Cashuurta Waxbarashada K-12 oo aad dalabto hadii ay u qalmaan. Fadlan si taxadir leh u akhri si aad u xaqijiso in aad hesho gudida cashuurta ee saxa ah.**

### **Xaqiji in Qoysku Dalbado Daynta Cashuurta, Hadii Ay u Qalmaan**

Inta aad wado cashuur celinta Minnesota ee qoyska, fadlan xaqiji inay u qalmaan Daynta Cashuurta Waxbarashada K-12 MN oo, hadii ay u qalmaan, waxa aad xaraysaa foomamka soo socda oo raaci cashuur celinta Minnesota:

- > Minnesota Foomka M1ED
- > Minnesota Foomka M1REF.

Waxa aanu u dirnay qoyska nuqulo risiidhada oo shayshay ah si ay u dalbadaan Daynta Cashuurta (waxay ku qoran yihiin waraaqaha buluuga ah). Qoysku waa inay la xidhiidhaan MAA hadii ay u baahan yihiin nuqulo dheeraad ah oo risiidhada ah.

### **Sida Uu U Shaqeeyo Minnesota Afterschool Advance**

MAA waxa uu isticmaalaa Nidaamka KU Qorista Daynta Waaxda Dakhliga ee Minnesota (M.S. 290.0679) si qoyska uu u amaahiyu xadiga Daynta Cashuurta Waxbarashada K-12 MN (M.S. 290.0674) ee ay u qalmaan si ay u dalbadaan hawla waxbarashada kadib qaar ama haadhweerka kombuyutarka taas oo badal u ah ku qorista qayb cashuur celintooda. Kani waxaa weeye dayn bilaa ribo, bilaa khidmad ah oo si toos ah looga gudo cashuur celinta qoyska, hadii ay jirto. Waxa aad macluumaad dheeraad ah ka ogaan kartaa [www.mnafterschool.org/how-it-works](http://www.mnafterschool.org/how-it-works).

Sidaas darteed, waxaa muhiim ah in qoysku xareeyo foomamka loo baahan yahay si uu u dalbado Dalabka Daynta Cashuurta Waxbarashada K-12 ee MN ee 2021, hadii ay u qalmaan. Tani waxa ay xaqijin doontaa in daynta loo gudo lacagta Daynta Cashuurta sida loogu talo geley. Hadii sidaa la samayn waayo waxay keeni kartaa in daynta laga gudo qayb kale oo lacagta qoyska ah (iyada oo hoos loo dhigayo xadiga dib loo helo) ama daynta aan la wada gudin, taas oo baajinaysa in lacagta in aan lagu isticmaalin sanadka xiga si loogu kaalmeeyo isla qoys ama qoys kale.

### **Khayraad Dheeraad ah oo ku saabsan Daynta Cashuurta iyo MAA**

Macluumaa dheeraad ah oo ku saabsan Daynta Cashuurta iyo nidaamka ku qorista la xidhiidha waxaa laga heli karaa websaytka Waaxda Dakhliga ee Minnesota.

Hadii aad qabto wax su'aalo ah, waxa aad la xidhiidhi kartaa Kooxda MAA: (612)-440-9342 / [maa@youthprise.org](mailto:maa@youthprise.org).